

Jamhuuriyadda Somaliland
Wasaaradda Isgaadhsiinta
iyo Teknoolajiyadda



Republic of Somaliland
Ministry of ICT

**Xeer-Nidaamiyaha
Ansixinta Tayada
Qalabka Isgaadhsiinta
Lr.05/002/2021**

**Equipment Type
Approval
Regulations
05/002/2021**



ARAAR

Wasiirka Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tiknoolajiyadda JSL

- Markaan Arkay:** Qodobka 3aad faqradihiisa 13aad iyo 14aad ee Xeerka Boosaha iyo Isgaashsiinta Jamhuuriyadda Somaliland Xeer Lr, 50/2020;
- Markaan Arkay:** Cutubka 7aad iyo qodobadiisa kala duwan ee Xeerka Boosaha iyo Isgaadhsiinta Xeer Lr.50/2020 oo si cad u qeexaya ogolaanshaha qalabka.
- Markaan Arkay:** Kobaca iyo hormarka baaxadda leh ee Isgaadhsiinta casriga ah .
- Markaan Tixgaliyay:** Muhiimadda ay leedahay ansixinta qalabka isgaadhsiinta ee dalka gudihiisa lagu adeegsado;
- Markaan Tixgaliyay:** Baahida loo qabo in la helo xeer-nidaamiye si haboon oo tifatiran ansixinta qalabka isgaadhsiinta.
- Sidaa Daraaddeed;** Wuxaan halkan aan ku soo saaray Xeer-Nidaamiyaha Ansixinta Tayada Qalabka Isgaadhsiinta, Xeer Lr. 05/002/2021 oo ka kooban qodobadan soo socda;

Contents

CUTUBKA 1AAD	5
QODOBBO GUUD	5
Qodobka 1aad	5
Magaca Xeer-Nidaamiyahan.....	5
Qodobka 2aad	5
Erey Bixin	5
Qodobka 3aad	6
Xadka Dabbaqaadda Xeer-nidaamiyaha	6
CUTUBKA 2AAD	7
MIDAYNTA HALBEEGGA QALABKA ISGAADHSIINTA	7
Qodobka 4aad	7
Masuuliyadaha Wasaaradda	7
Qodobka 5aad:	8
Shuruudaha looga baahan yahay Midaynta Halbeegga:.....	8
CUTUBKA 3AAD:	9
HABRAACA ANSIXINTA TAYADA QALABKA ISGAADHSIINTA	9
Qodobka 6aad:	9
Caddaynta Soo Saaraha Qalabka:.....	9
Qodobka 7aad:	9
Habraaca Shahaadada Ansixinta Tayada Qalabka Isgaadhsiinta:	9
Qodobka 8aad:	10
Qiimaynta Farsamo ee Qalabka:	10
Qodobka 9aad:	11
Tijaabada Goobta ee Qalabka:	11
Qodobka 10aad:	12
Shahaadada Ansixinta Tayada Qalabka	12

Qodobka 11aad:	13
Muujinta Calaamadaha Hubinta Tayada Qalabka	13
Qodobka 12aad:	13
Ka Noqoshada Oggolaanshaha Qalab	13
Qodobka 13aad:	14
Hubinta La Jaanqaadka	14
Qodobka 14aad:	14
Diiwaanka Qalabka La Hubiyay	14
CUTUBKA 4AAD:	15
GABAGABO	15
Qodobka 15aad:	15
Tacrifadda Hubinta Tayada Qalabka	15
Qodobka 16aad:	15
Tayada Adeegga	15
Qodobka 17aad:	15
Takoorid la'aanta shaqada	15
Qodobka 18aad:	16
Damaanad	16
Qodobka 19aad:	16
Ciqaabta	16
CUTUBKA 4AAD:	17
GABAGABO	17
Qodobka 20aad	17
Kaabista iyo Wax-bedelka Xeer-nidaamiyahan	17
Qodobka 21aad	17
Dhaqangalka Xeer-nidaamiyahan	17

PART I **PRELIMINARY PROVISIONS**

1. Citation:

These Regulations may be cited as the “Electronic Communications Equipment Standards” Regulations, 2020.

2. Application:

These Regulations shall apply to electronic communications equipment imported for use in the Somaliland for connection to any electronic communications network for the purpose of receiving or transmitting electronic communication signals.

3. Interpretation:

In these Regulations, unless the context otherwise requires:
“Act” means the Postal and Telecommunications Act of 50/2020.

“Customer” means end user of communications services.

“Electronic Communication Equipment or Equipment” means any electronic communications equipment, whether network or terminal, intended for use with communications and broadcasting services.

“Ministry” means the Ministry of ICT – Republic of Somaliland.

CUTUBKA 1AAD **QODOBBO GUUD**

Qodobka 1aad

Magaca Xeer-Nidaamiyahan

Xeer-nidaamiyahan waxaa loogu yeedhayaa Xeer-nidaamiyaha Ansixinta Tayada Qalabka Isgaadhsiinta Xeer Lr. 05/002/2021.

Qodobka 2aad

Erey Bixin

Xeer-nidaamiyahan dhexdiisa erayadan soo socda waxa loola jeedaa:

Xeer-nidaamiyahan dhexdiisa erayadan soo socda waxa loola jeedaa:

Adeeg Isgaadhsiineed: Waxa loo la jeedaa adeeg kasta oo loo fidiyo macaamiisha iyada oo la adeegsanayo shebekadaha isgaadhsiinta.

Ansixin Qalab “Type Approval” Waxa loola jeedaa oggolaanshaha isticmaalka ama soo dejinta noocyada kala duwan ee qalabka isgaadhsiinta.

Isgaadhsiin: Waxa loola jeedaa, lalin, diris, ama helis calaamat, biliig, xog, qoraal, maqal iyo muuqaal ah oo dhex mara shebekadaha.

“Network Equipment” means intermediate electronic communications equipment that facilitate connection or delivery of communications signals between networks.

“Type Approval” means a method of checking for compatibility of all electronic communications equipment with any operating electronic communication network as well as conformity to standards.

Macmiil “Customer”: Waa qof kasta oo hela adeeg isgaadhsiineed.

Ruqsadle: Waxa loo la jeeda shirkad la siiyay ogolaansho ay ku bixin karto adeeg isgaadhsiineed si waafaqsan Xeerka Boosaha iyo Isgaadhsiinta Somaliland Xeer Lr.50/2020.

Qalabka Isgaadhsiinta: Waxa loola jeedaa qalab kasta oo loo isticmaalo ama loogu talo-galay in loo isticmaalo isgaadhsiinta kaas oo ku xidhan shebekadda isgaadhsiinta.

Shebakad Isgaadhsiin: Waxa loo la jeedaa habka loo gudbiyo ama la isku waydaarsado xogaha isgaadhsiinta ee kala duwan.

Wasaarad: Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Teknoolajiyadda Somaliland.

Xeer: Waxaa loola jeedaa Xeerka Boosaha iyo Isgaadhsiinta Somaliland Xeer **Lr. 50/2020**.

Xog “Data”: Waxa loola jeedaa caddaymaha, qoraalada iyo tilmaamaha uu sameeyo nidaam isgaadhsiineed.

Qodobka 3aad

Xadka Dabbaqaadda Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan waxa lagu fulinayaan cidda ama ruqsadlahaa soo dejiya qalabka isgaadhsiinta noocyadooda kala duwan ee ku xidhmaya shabakadaha isgaadhsiinta ee helista iyo dirista bilitga “signals”.

PART II

ELECTRONIC COMMUNICATIONS

EQUIPMENT STANDARDISATION

4. Responsibility of The Ministry:

- (1) The Ministry shall be responsible for formulating technical standards related to electronic communications equipment.
- (2) The Ministry shall maintain database of all communications equipment authorized for use in the Republic.
- (3) The Ministry shall, subject to applicable procedures and fees, and at the request of equipment manufacturers or equipment suppliers or users, conduct type approval tests through its laboratory or any other relevant facility or means and issue type approval certificates in respect of electronic communications equipment intended for use in the Republic.
- (4) The Ministry shall, in conducting type approval certification of electronic communications equipment, be guided by either technical standards formulated and published by the Ministry under these Regulations or adopted national, regional, or international standards.

CUTUBKA 2AAD

MIDAYNTA HALBEEGGA QALABKA

ISGAADHSIINTA

Qodobka 4aad

Masuuliyadaha Wasaaradda

Wasaaraddu waxa ay:

- 1) Qaabeynaysaa heerarka farsamo ee la xidhiidha qalabka isgaadhsiinta iyada oo diyaarinaysa halbeegyo lagula soconayo tayadooda.
- 2) Kaydinaysaa xogta qalabka isgaadhsiinta ee la oggolaaday in dalka gudihiiisa lagu adeegsado.
- 3) Hubinaysaa qalabka isgaadhsiinta ee kala duwan marka ay soo codsadaan shirkadaha qalabka sameeya, soo dajiyu ama adeegsada, iyada oo la raacayo habraaca ansixinta tayada qalabka iyo tacriifadda loo dejiyay, iyada oo ku baadhaysa shaybaadhada qalabka ee dalka gudihiiisa ama dibediisa ama qaab kasta oo suurta gelinaya ansixinta tayada qalabka.
- 4) Bixin doontaa shahaadada ansixinta tayada qalabka isgaadhsiinta iyada oo raacaysa halbeegyada farsamo ee ay u dejisay ee heer qaran, ama caalami ah.

<p><u>5. Requirements for Equipment Standardization:</u></p> <p>1) The electronic communications equipment intended for sale in the Somaliland shall be subjected to certification and type approval by the Ministry.</p> <p>2) For the purpose of conformity to standards, any electronic communications equipment to be connected to electronic communications networks in the Somaliland shall undergo type approval certification.</p> <p>3) The following equipment shall require type approval before sale, distribution, or installation in the Republic: -</p> <ul style="list-style-type: none">(a) electronic communications equipment to be used for connection or access to the public operating electronic communication networks.(b) wireless communications equipment; and(c) Set-Top- Boxes used to receive digital Television signals. <p>4) The Ministry shall, once a year, issue a list of type approved electronic communications equipment together with technical standards and applicable type approval fees.</p>	<p>Qodobka 5aad:</p> <p>Shuruudaha looga baahan yahay Midaynta Halbeegga:</p> <ol style="list-style-type: none">1) Qalab kasta oo isgaadhsiineed oo loogu talo galay in lagu iibiyoo ama lagu adeegsado dalka gudihiisa, waa in uu Wasaaradda ka haystaa shahaadada ansixinta tayada qalabka.2) Qalab kasta oo isgaadhsiineed oo ku xidhmaya shabakad isgaadhsiineed oo dalka gudihiisa ah waa in uu maraa habraaca ansixinta tayada qalabka isgaadhsiinta.3) Qalabkan hoos ku xusan waa in la hubiyaa ka hor inta aan la iibin, qaybin ama lagu rakibin shabakad isgaadhsiineed ee gudaha dalka ah:<ol style="list-style-type: none">a) Qalabka lagu xidhayo shabakadda isgaadhsiinta guud.b) Qalabka lalinta ee aan xadhigga lahayn.c) Qalabka loogu talo galay qabashada biligta muuq-baahiyaha.4) Wasaaraddu waxa ay soo saaraysaa xogta qalabka la ansixiyay, halbeegyadooda iyo tacriifadooda sanadkiiba hal mar.
--	--



PART III
PROCEDURES OF TYPE APPROVAL OF
ELECTRONIC COMMUNICATIONS
EQUIPMENT

6. Manufacturer's Declaration of conformity (MDC):

- 1) The equipment manufacturer shall, for every electronic communications equipment, declare that the equipment conforms to international and national standards before the equipment is approved for use in the Republic.
- 2) Any manufacturer, who hosts any database related to any electronic communications equipment in use within the Somaliland shall declare that such hosted information is retrievable for Ministry's access whenever is necessary.

7. Ministry's Type Approval Certification Process:

- 1) for Type Approval Certification Process, an applicant should:
 - (a) collect type approval application form from the Ministry.
 - (b) fill the form and return the same to the Ministry with the following documents: -
 - (i) user manual.
 - (ii) operational manual.
 - (iii) technical document consisting of a general description of equipment, technical data and facilities supported.

CUTUBKA 3AAD:
HABRAACA ANSIXINTA TAYADA
QALABKA ISGAADHSIINTA

Qodobka 6aad:

Caddaynta Soo Saaraha Qalabka:

- 1) Shirkadaha qalabka isgaadhsiinta sameeyaa, waa in ay ay caddeeyaan in qalabku la jaan qaadayo halbeegyada dalka, gobolka iyo caalamka ka hor inta aan loo ansixin in lagu adeegsado dalka.
- 2) Shirkadaha qalabka sameeya ee haya xogaha qalabka isgaadhsiinta ee lagu adeegsado Somaliland gudaheeda waa in ay u sahlaan Wasaaradda in ay ku xidhanto marka ay u baahato.

Qodobka 7aad:

Habraaca Shahaadada Ansixinta Tayada Qalabka
Isgaadhsiinta:

- 1) Si loo sameeyo shahaadada ansixinta tayada qalabka isgaadhsiinta, codsaduhu waa in uu:
 - a) Qaato foomka codsiga ansixinta tayada qalabka.
 - b)
 - c)

<ul style="list-style-type: none"> (iv) sales brochures. (v) manufacturers declaration of conformity; and (vi) any other documents that the applicant considers useful to the Ministry. <p>8. Technical Evaluation:</p> <p>(1) Technical evaluation of an equipment shall comply with the international and national standards and be carried out in the following manner: -</p> <ul style="list-style-type: none"> (a) document examination; and (b) laboratory testing of equipment sample, where applicable. <p>(2) The samples of equipment to be submitted for testing shall be: -</p> <ul style="list-style-type: none"> (a) in a good working condition. (b) properly configured for testing and complete with the necessary test adapters; and (c) clearly marked with the trade name, model, and serial number. <p>(3) The applicant shall provide promptly technical details or clarifications as maybe required by the Ministry.</p> <p>(4) Subject to the provision of sub regulation (3), the application shall be rejected if the applicant fails to respond within three months and be informed in writing.</p> <p>(5) After testing, the applicant shall be required to collect, within 60 days, any sample of equipment submitted, and the Ministry shall not be obliged to return to the applicant any sample of equipment and associated</p>	<ul style="list-style-type: none"> d) Soo buuxiyaa foomka codsiga ansixinta tayada qalabka ee Wasaaradda, isaga oo ku soo lifaaqaya caddaymahan: <ul style="list-style-type: none"> i. Buugga adeegsadaha. ii. Buugga Iisticmaalka (Qaabka uu qalabku u shaqaynayo). iii. Faahfaahin la xidhiidhta guud ahaan qalabka, xogta farsamo iyo adeegyada uu kaabayo. iv. Buugga iibka. v. Caddaynta soo saaraha qalabka ee badbaadada. vi. Caddaymaha kale ee ay Wasaaraddu uga baahan karto qalabka. <p>Qodobka 8aad:</p> <p>Qiimaynta Farsamo ee Qalabka:</p> <ol style="list-style-type: none"> 1) Qiimaynta farsamo ee qalabku waa in ay la jaan qaadaan halbeegyada dalka iyo kuwa caalamiga ah, waxaana loo qiimaynayaa sidan soo socota: <ul style="list-style-type: none"> a) Baadhista caddaymaha qalabka. b) Shaybaadhista qalabka, haddii loo baahdo. 2) Muunadaha qalabka ee loo soo gudbiyay tijaabintu waa in ay:
---	--

documentation submitted for the purpose of type approval.

(6) Any sample of equipment submitted for testing shall be subject to disposal if not collected after twelve months from the date of submission.

9. Field Tested Equipment:

(1) Field tests shall be aimed at providing confidence that electronic communications equipment performs satisfactorily during normal operation.

(2) When requested, field tests shall also apply to new electronic communications equipment.

(3) Field testing of equipment shall take a maximum of three months.

10. Type Approval Certification:

(1) The Ministry shall issue a type approval certificate to the successful applicant for a specific model of equipment.

(2) The approved equipment shall not be modified in any way without the approval and reevaluation by the Ministry.

(3) The type approval granted under these Regulations shall, in no case, be construed as a guarantee by the Ministry of the proper functioning, performance or quality of the equipment.

(4) It shall be the duty of the supplier, importer or distributor to ensure that the approved equipment interworks properly with the public electronic communication network.

- a) Noqdaan kuwo si fiican shaqaynaya.
- b) Si fiican loo qaabeeeyay, loona diyaariiyay qaab loo tijaabin karo.
- c) Si cad loogu calaamadiyay magaca ganacsiga, nooca iyo lambarka taxanaha ah.
- 3) Codsaduhu waa in uu soo gudbiyaa tilmaamaha farsamo oo dhammays tiran, haddii loo baahdo.
- 4) Muddo **saddex bilood** gudahood ah haddii uu codsaduhu ku soo gudbin waayo warbiximaha faqradda sare (3) ku qoran, lama ansixin doono qalabka.
- 5) Muddo **lixdan maalmood** gudahood ah waa in uu codsaduhu ka qaataa qalabkiisa Wasaaradda ka dib makra la tijaabiyo, dhamaan warbiximaha ka soo baxay waxa hayn doonta Wasaaradda.
- 6) Haddii muddo sannad ah qalabkaasi uu codsaduhu qaadan waayo, Wasaaraddu waa ay tuuraysaa.

Qodobka 9aad:

Tijaabada Goobta ee Qalabka:

- 1) Wasaaraddu waxa ay hubinaysaa qalabka isgaadhsiinta iyaga oo shaqaynaya si loogu

(5) The Ministry shall not be liable for any interference caused to any other equipment, injury or loss of life, or damage to property, arising as a direct or indirect result of the use of any approved equipment.

(6) Any approval or refusal by the Ministry shall be made within **two months** from the date of application of such approval.

11. Display of the Label for type approved equipment:

(1) All electronic communication equipment complying with technical conditions shall be affixed with type approval label to be provided by the Ministry.

(2) Every supplier, importer, distributor, or seller shall, where applicable, ensure that an equipment offered for sale or for private use is clearly affixed with the type of approval label containing the following: -

- (a) the logo of the Ministry.
- (b) the type of the equipment; and
- (c) the alphanumeric identifications.

12. Withdrawal of approval of equipment:

The Ministry shall withdraw approval of any electronic communications equipment where it interferes with or pose any malfunction that degrades the efficiency of any electronic communication service.

- 2) kalsoonaadu in ay qabanayaan shaqadii loogu talo galay.
- 3) Marka loo baahdo, qalabka tijaabada goobtu waa in uu yahay mid cusub oo shaqaynaya.
- 4) Tijaabada goobta ee qalabku waxa ay qaadan kartaa ugu badnaan **saddex bilood**.

Qodobka 10aad:

Shahaadada Ansixinta Tayada Qalabka

- 1) Wasaaraddu waxa ay codsadaha u soo saaraysaa shahaadada hubinta tayada qalabka.
- 2) Qalabka isgaadhsiinta ee la guddoonsiiyay shahaadada waxba lagama baddali karo iyada oo aan Wasaaradda la soo ogaysiin.
- 3) Shahaadada hubinta tayada qalabku maaha macnaheedu in qalabkani yahay qalab si wanaagsan u shaqanaya, oo aan xumaan Karin.
- 4) In qalabku u shaqaynayo sidii loogu talo galay waa mid u taalla shirkaddii samaysay ama iibisay.
- 5) Wasaaraddu masuul kama aha isdhexgalka hirarka ee uu qalabku sameeyo, dhaawac ama dhibaato nafeed ama hanti oo uu cid soo gaadhsiyo qalabkaasi.

13. Test for Compliance:

Measurements and tests for compliance shall be performed at the Ministry's laboratory or by an agent designated by the Ministry for that purpose.

14. List of Approved Electronic Communication Equipment:

A list of approved electronic communications equipment shall be published in the Ministry's periodical publications or website and local newspapers.

- 6) Oggolaanshaha ama diidmada hubinta tayada qalabka ee Wasaaraddu waxa uu ku soo baxayaa muddo **laba bilood** gudahood ah.

Qodobka 11aad:

Muujinta Calaamadaha Hubinta Tayada Qalabka

- 1) Qalab kasta oo isgaadhsiineed waxa ay Wasaaraddu ku dhajin doontaa calaamad muujinaysa in la hubiyay.
- 2) Shirkadaha soo dajiya, iibiya ama qaybiya qalabka isgaadhsiinta waa in ay muujiyaan calaamadda ay Wasaaraddu ku dhajisay marka looga baahdo, calaamaddaas ah:
 - a) Astaanta Wasaaradda.
 - b) Nooca Qalabka.
 - c) Lambarro is xiga.

Qodobka 12aad:

Ka Noqoshada Oggolaanshaha Qalab

Wasaaraddu waxa ay ka noqon kartaa qalab isgaadhsiineed oo hore loo hubiyay haddii uu is-dhex-gal ama cillado ku keenayo adeeg isgaadhsiineed oo hore u shaqaynayay.

PART IV GENERAL PROVISIONS

15. Type Approval Fees:

Equipment type approval application and processing fees shall be as prescribed in the Ministry's Fees schedule.

16. Quality of Service:

- (1) Any network service provider shall ensure that the prescribed quality of service is not impaired by substandard equipment, whether network or terminal.
- (2) Any service impairment caused by substandard equipment shall be reported to the Ministry for necessary action.

17. Non-discrimination treatment:

Equipment Standardization shall be such that all electronic communications equipment for use in the Somaliland undergo Type Approval certification by the Ministry on a non-discriminatory manner.

18. Warranty:

- (1) All electronic communications equipment for use in the Somaliland shall be sold with a minimum warranty of twelve months.

Qodobka 13aad:

Hubinta La Jaanqaadka

Cabbiraadaha iyo hubinta in qalabku la jaanqaadayo halbeegyada Wasaaradda ama caalamku dhigay waxa samayn karta Wasaaradda ama cid ay u igmatay oo shaqada qaban karta.

Qodobka 14aad:

Diiwaanka Qalabka La Hubiyay

Diiwaanka qalabka isgaadhsiinta ee la hubiyay waxa lagu soo saari doonaa faafinta rasmiga ah ee wasaaradda ama mareegaha internet-ka iyo wargaysyada maxalliga ah.

(2) The warranty in sub-regulation (1) shall be offered as a separate signed form or as part of sales receipt and shall have clear description of covered services, including but not limited to, replacement or free maintenance during the warranty period.

(3) Any person who purchases any communications equipment shall demand a warranty and a receipt from the seller, distributor, or importer of such equipment.

19. Penalty:

(1) Any vendor, importer, distributor, or reseller of electronic communications equipment, that allows in the market equipment which has not been type approved by the Ministry for use in the Somaliland commits an offence and shall, be liable to a fine.

(2) Any vendor, importer, distributor, or reseller of communications equipment that sells any communications equipment without warranty as prescribed under these Regulations commits an offence and shall, be liable to a fine.

20. Amendments:

This regulation will be amended according to the Ministry when needed.

**CUTUBKA 4AAD:
GABAGABO**

Qodobka 15aad:

Tacriifadda Hubinta Tayada Qalabka

Tacriifadda hubinta tayada qalabka isgaadhsiinta waxa lagu soo saari doonaa shaxda tacriifadaha Wasaaradda Isgaadhsiinta & Teknoolajiyadda.

Qodobka 16aad:

Tayada Adeegga

- 1) Shirkad kastaa waa in ay hubisaa in tayada qalabku aanay is dhimayn haddii lagu rakibo shabakad ama qalab kale.
- 2) Qalab kasta oo tayadiisu yaraato taasoo ay qalab kale sababtay, waa in Wasaaradda lala soo socodsiiyaa.

Qodobka 17aad:

Takoorid la'aanta shaqada

Ansixinta qalabku waxa loogu talo galay dhamaan qalabka isgaadhsiineed ee lagu adeegsado ama la keeno gudaha Somaliland iyada oo loo siman yahay.

<p><u>21. Enforcement:</u></p> <p>This regulation will be enforced by the Ministry when signed by the Minister.</p> <p><u>Appendix:</u> <u>List of equipment to be Type Approved:</u></p> <ol style="list-style-type: none">1. Bluetooth devices.2. RFID devices.3. Wireless microphones.4. Remote controls.5. Alarm systems.6. Low power devices less than one milliwatt.7. Mobile phones and handheld devices.8. Cordless telephones.9. Terminal equipment (CPE).10. Wireless LAN Equipment.11. Walkie-talkie.12. Cable modems.13. ADSL Equipment.14. STBs high power radio communication equipment.15. Complex/ multi line equipment.16. PSTN switching systems.17. ISDN PRA/BRA equipment.18. PBX.	<p>Qodobka 18aad: Damaanad</p> <ol style="list-style-type: none">1) Qalabka isgaadhsiinta ee lagu adeegsanayo gudaha Somaliland waa in ay lahaadaan damaanad ugu yaraan hal sano ah.2) Damaanadda ku xusan qodobka sare waa in ay ku qornaataa xaashi gaar ah taas oo lagu caddaynayo adeegyada ku jira damaanadaas sida cillad saarista ama beddelidda qalabka wakhtiga damaanadda.3) Qof kasta oo iibsada qalab isgaadhsiineed waa in uu codsadaa helidda damaanadda. <p>Qodobka 19aad: Ciqaabta</p> <ol style="list-style-type: none">1) Shirkad kasta oo soo dejisa, qaybisa, dib u iibisa ama adeegsata qalab isgaadhsiineed oo aan la ansixin, waxa ay ku mutaysanaysaa ganaax.2) Shirkad kasta oo soo dejisa ama qaybisa ama dib u iibisa qalab isgaadhsiineed oo aan lahayn damaanad, waxa ay ku mutaysanaysaa ganaax.
--	---



- 19. Mobile radio access network equipment.
- 20. Mobile network switching equipment.
- 21. Fixed and wireless broadband network equipment.
- 22. Broadcast TV/Radio equipment.

**CUTUBKA 4AAD:
GABAGABO**

Qodobka 20aad

Kaabista iyo Wax-bedelka Xeer-nidaamiyahan

Xeer-nidaamiyahan waxa lagu samayn karaa wax-kabeddel iyo kaabis wakhtiga loo baahdo.

Qodobka 21aad

Dhaqangalka Xeer-nidaamiyahan:

Xeer-nidaamiyahan waxa uu si rasmi ah u dhaqan geleya isla maalinta uu saxeexo Wasiirka Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Teknalooyiyadda laguna soo saaro faafinta rasmiga ah.

15/06/2021